



MA DOONEYSAA INAAD WAX BADAN OGAATO?

Miyaadan hubin inaad qaadato daawada saxda ah, ma waxaad wayeello daawo ka qaadda daawada aad qaadato, mise ma qabtaa su'aalo ku saabsan daawenyta?

Hadii ay jawaabtu haa tahay, la xiriir Dhakhtarkaaga Guud mise dhakhtarka maareynta cudurrada mise kalkaalisada joogta **Waaxda Daryeelka** ee gobolkaaga:

- Antwerp: 02 553 08 92
- Limburg: 02 553 08 93
- East Flanders: 02 553 08 94
- Flemish Brabant: 02 553 08 93
- West Flanders: 02 553 08 94

Waxaa kale oo aad la xiriiri kartaa kalkaalisada **Ururka Flemish ee Daryeelka Caafimaadka** **Habdhisika Neefta iyo Maareynta Qaaxada** (VRGT) ee gobolkaaga:

- Antwerp
Berchem: 03 287 80 10 - Turnhout: 014 41 13 62
- Brussels: 02 411 94 76
- Limburg: 011 22 10 33 (Hasselt)
- East Flanders: 09 225 22 58 (Ghent)
- Flemish Brabant: 016 79 09 92 (Leuven)
- West Flanders
Ostend: 059 79 02 58 - Kortrijk: 059 79 02 57



Waaxda Daryeelka
infectieziektebestrijding@vlaanderen.be
www.departementzorg.be



Vlaanderen
is zorgzaam en
gezond samenleven

Waxaa daabacay Karine Moykens, Xoghayaha Guud, Waaxda Daryeelka, Boulevard Simon Bolivar 17, 1000 Brussels - Maayo 2025



QAADAY CUDURKA QAAXADA

balse ma xanuunsana

**DEPARTEMENT
ZORG**

departementzorg.be

Daawada ayaa mararka qaar sababi karta [waxyello](#). Waxyellooyinkan soo socda ayaa suutagal ah:

- xanuunnada beerka oo leh mise aan lahayn cagaashow
- Daal
- madax xanuun, wareer
- faham yari
- cuncun leh mise aan lahayn finan
- cabasho gaastarig

Kala hadal wax alla wixii waxyello ah dhakhtarka guud (qoyska) ee daawada qoray. Daawada Rifampicin waxay dareeraha jirka ka dhigtaa midabki huruudda. Tani maahan wax laga walwalo, midabka huruudda waa falcelin caadi ah oo aan waxyello lahayn.

Had iyo jeer u foajignow astaamaha sida:

- qufac raaga
- miisaanka oo is dhima
- dhidid habeenkii ah
- cunto xumo
- caafimaad darro guud
- xaalada guud ahaan kasii darta
- laab xanuun

[haddii astaamaha sii jiraan, dhakhtar aad.](#)

QAADAY CUDURKA BALSE MA XANUUNSANA

Baaritaanka tiibishada maqaarka

Dhawaan waxaa lagaa baaray maqaarka qaaxada si loo eego in aad qabto bakteeriyada keeni karta qaaxada.

Baaritaanka maqaarka waxaa laga arkay cudurka Taas waxay la micne tahay inaad qabto cudurka. Waa lagaa heli karaa cudurka haddii lagaa tallaalay qaaxada wakhti hore.



Dalalka qaar ayaa weli tallaala cudurka qaaxada. Tani kaama ilaalinayso cudurka noloshaada oo dhan. Markaa taasi waxay adkeynaysaa in la fahmo micnaha baaritaanka maqaarka laga helay qaaxada, markaa waa inaad kala hadashaa Dhakhtarkaaga Guud.

Raajada sambab aan qabin qaaxo.

Intaa waxa dheer, waxaa kale oo lagaa qaaday raajada sambabada si loo qiimeeyo inaad qaadeen qaaxo. Runtii, qaaxadu waa cudur sambabada haleela.

Ma jiraan wax qayrul caadi ah oo hadda ka muuqda raajada. Taas micneheedu waxa weeyaan ma aad xanuunsanid hadda. Sidoo kale ma qaadiin kartid dadka kugu hareereysan.

DAAWOYINKEE BAAN QAATAA?



Farqi weyn ayaa u dhexeeya marka aad qabto bakteeriyada qaaxada iyo marka aad xanuunsantahay.

90% caabuqyada laguma xanuunsado. Jirka waxa uu la dagaalaa caabuqa isagoo soo saara unugyada difaaca jirka. Taasi waa sida jirka isku difaaco. Tani waxay inta badan joojisaa in xanuunku bilowdo. Haseyeeshee, unugyadan kahortagga ah mararka qaar kuma filna inay kaa ilaaliyaan inaad qaaddo qaaxada.

Haddii lagaa helo, daawo ayaa lagugula talinayaa inay kahortagto inaad xanuunsato. Kala hadal tan dhakhtarkaaga guud.

Baadnaa, tani waxay noqon doontaa isoniazid (magaca shirkadda Nicotibine®) iyo/mise rifampicin (magaca shirkadda Rifadine®). Daawooyinkan waxaa lagu heli karaa bilaash marka dhakhtar qoro.

MA QAADAN KARAA DAAWOYIN KALE INTA LAGU JIRO DAAWAYNTAYDA?

Had iyo jeer u sheeg Dhakhtarkaaga Guud dawooyinka kale ee aad qaadanayso. Sidoo kale haddii aad isticmaasho daawooyinka uurka kahortagga (sida kiniinka). Daawadu waxay ka dhigtaa kaniiniga mid waxtar yar leh. Markaa uur waad qaadi kartaa.

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN ISKA ILAALIYO MARKAAN DAAWADA QAADANAYO?

Waxaa muhiim ah in aad qaadato daawada maalin kasta muddada lagu qoray (taas oo inta badan ah wakhti dheer). Haddii kale, daaweyntu ma noqon doonto mid waxtar leh oo bakteeriyadu waxay noqon kartaa mid daawadu aanay waxba ka tarin.

- Waxaa fiican in daawada lagu qaato calool maran oo leh wakhti go'an, hal mar maalintii.
- Daawadu waxay ku timaadaa qaab kaniiniyo ah, budo mise cabitaan.
- Carruurta yaryar, waxay qaadan karaa daawada 30 daqiiqadood kahor quraacda iyadoo la isticmaalayo qaaddo sharoobo ah.
- Inta lagu jiro daawaynta, waxaa fiican inaad cabbin khamriga sababtoo ah waxay saameyn xun ku yeelan kartaa beerkaaga.
- Dadka qaar ayaa u nugul bacadka marka ay daawada qaataan. Hadaba waxaa lagu talinayaa in aan bacadka la fadhiisan muddo dheer.
- Adiga ha beddelin daawadaada adigoo la tashan Dhakhtarkaaga Guud.

